Fikirka iyo Nolosha

By **admin** February 21, 2017



Uumiyaha oo dhammi si isku mid ah ayuu isugu raacsan yahay aragtida
qeexaysa in ifku uu yahay adduunkan iyo waxa ku hareeraysan, kaas oo
qofku inta uu ku nool yahay dushiisa, dhaqdhaqaaqa iyo ficillada uu
samaynayaa ay yihiin gudashada waajibaadkii nololeed ee la gudboona

Sidoo kale, la iskuma diiddana, in cimriga dadku uu yahay wakhti aad u
kooban, isla markaasna uu qof kastaa ba joogo muddo yar oo bar ay ku
dhammaato leh. Hase yeeshee, tiirarka ugu mudan ee bini aadamku si v
ugu kala aragti fog yihiin waxa ka mid ah jiritaanka Aakhiro. Dadku in ay
garasho iyo garaad leeyihiin ka sokow, ummadaha qaarkood waxa ay
helayeen xog samaawi ah oo ka warramaysa ujeeddooyinka nolosha,
xaaladaha dabiiciga ah ee ifka, cidda loo hoggaansamayo iyo waxa loo
tagayo aakhiro inta ba. Sidaas oo ay tahay weligeed ma ay dhicin in isku
loo aamino qaddiyaddaas.

In nolosha aakhiro ee danbe khilaaf joogto ahi ka taagnaado waxa saba
basharka oo marka horeba aad ugu kala duwanaa si u aragga noloshan
hore ee adduunka oo dhan. Tan iyo abuurtii nolosha, waxa aadamaha d
yaallay su’aalo door ah iyo doodo ad adag oo udub dhexaad u ahaa
aragtiyahan. Weydiimahaas waxa ugu mudnaa: Yaa abuuray waxan oo
dhan? Yaa loo hoggaansamayaa? Waa maxay macnaha runta ah ee ay
noloshu makhluuqa u samaynaysaa? Maxaa ka dambeeya dhimashada

qaar kale oo intaas ka farcama. Sidaas darteed, waxa la odhan karaa, w
intaas ba dadku ay raadinayeen xaqiiqooyinka kawnkan, noolahan iyo ci
maamusha ee ay mudan tahay in loo hoggaansamo.

In su'aalahaas looga jawaabo bini aadamka, waxa ka soo degey Kutub,
kuwaas oo loo soo dhiibay mid walba shakhsi laga dhex doortay umma
ay risaaladdaasi ku socoto. Markaas ayuu kala dheereeyay caqliga dadl
oo ay qaar aqbaleen xaqiiqooyinkii hor yaallay, cilmigii, mulkigii, iyo
hibooyinkii loo sakhirayna ku xoojiyeen mabaadii'dii xaqa ahayd ee ay
kutubtaasi sideen. Waxa kale oo la arkay in ay dadka qaar ku adkaystee
toodii oo ay mar ba hummaag tijaabiyeen, afkaaro ay isku maamulaann
yab yabeen. Deetana waxa timid inay noolayaal iyo ma noolayaal kale
Ilaahyo ka dhigteen.

Ilaa iyo maanta raadadkii cidhib xumada lahaa ee ay dadkaasi ka tagee
waa kuwo la isla yaqaanno oo aasaar ahaan loo tixgeliyo. Tusaale ahaa
astaamaha ugu waawayn ee casrigan dunida yaalla iyo cilmiga la
adeegsado intooda ugu badani waa waxii ka hadhay qoomamkaas. Laa
dadyowgaasi waxay ku takri faleen deeqihii lagu mannaystay, waxaanay
xad gudbeen karaamadii lagu galladay. Markaas ayay noqdeen qaar loo
adeegsado awooddii ay u hoggaansami waayeen oo la halaago: kuwo
dhulka la la rogo, kuwo duufaanno lagu kiciyo, kuwo biyo lagu qarqiyo iy
kuwo musiibooyin kale lagu sallido inta ba.

Dadka wakhtigan dunida ku nooli markii ay xaqiiqooyinka raadadkaas h
kari waayeen ayay ku tilmaameen: la yaabkii dunida "World Miracles".
Maanta waxaad arkaysaa iska ba dhaaf Islaamka dilan ee dunida kale'e
Soomaali ah oo la yaabban diyaarad iyo dayax gacmeed oo durtaba is
dhiibay. Tolow miyaanu qiimayn taariikhda iyo cilmiga dunida yaalla
ummadihii iyaga oo nool samaynayay ee dhulka fasahaadinayay iyo sid
dadkii karaamada aadaminimo yiqiinsanaa ugu jilib dhigayeen, ugu
samrayeen, diinta ugu baaqayeen, ugu na arkayeen dad hallaysan?! Is

diiddada labada xilli iyo labada Islaam waxa lagu sheegaa in jiilkaasi ahaayeen dad aan bah da laga saarin oo si dhab ah uga turjumayay xaqiiqooyinkii ay rumeeyeen. Waxa kale oo la sheegaa inay ahaayeen da muhmal laga galiyo himilooyinkooda ay uga fududayd inay hanuuniyaar boqorradii iyo saadadii hallaysnayd ee kibirka iyo tookha looga hadhay. Gaalada maanta adduunka ku nooli waxay ku joogaan jidkii iyo hammig facyaashaas. Sidaas darteed, Islaamka wakhtigan waxa la gudboon ina sidaas si ka xeel dheer u raacaan, rumeeyaan, ugu na dhaataan guulihii, majarihii iyo ma hadhooyinkii jiilashii hirgaliyay ahdaaftii ay u noolaayee Markaas ayuun bay caqiiqadadu dhammays noqon kartaa.

Tan iyo tarankii aadamaha, qalabka dadka noloshooda halbeegga u aha waxa uu ahaa *Fikirka*. Isaga ayay noloshooda ku jihaynayeen, farsamadooda ku horumarinayeen, caqabadaha hor yaallana ku xallinay Fikirka binu aadamka waxa la yidhaahdaa wuxuu soo maray heerar iyo marxalado kala duwan. Cilmi ahaan, “Fikirka” waxa lagu qeexaa: *firfircoonida caqliga aadamuhu kala hor tago mushkiladaha noloshiisa ku gudban, isla markaasna kaga falceliyo sawirka uga muuqda astaamaha dabiiciga ah*. “Fikirka” ayaa mar kasta xukumayay nolosha dadka, sida ay u noolaanayaan iyo sida ay u muuqanayaan inta ba. Heerarka aasaasiga ah ee fikirka dadku soo maray waxa saldhig u ahaa

1. **Heerkii Dareemaha:**oo ahaa in ay dadku ka fikiri karaan oo keli ah ilaa inta ay dareemayaashoodu gaadhsiisan yihiin ama uu qofku cabbiri k malayn karo, isla markaasna fahmi karo xaaladaha ay shantiisa daree la falgali karaan oo qudha.
2. **Heerkii Falsafiga:**oo ahaa marxaladdii ay u gudbeen dadku in ay ka fikiraan astaamaha dabiiciga ah iyo muuqaalka adduunkan iyo waxiya kale oo aanu suurayn karin qof fikirkiisu ku kooban yahay dareemayaashiisa, sida: nolosha, dhimashada, abuurta, iyo abuuraha.
3. **Heerkii Cilmiga:**oo ahaa wakhtigii la daahfuray culuumta ay dadku ku awoodeen in si xawli ah ay isu dhex galaan oo ay sameeyaan tijaaboc faro badan iyada oo la adeegsanayo qalab iyo farsamo hor leh oo si t ah wax looga ga ogaan karo dhulka, meerayaasha, hawada, badaha iy wixii la mid ah. Waxa la helay cilmi turjumi kara macluumaadkii la soc ururiyay iyo in la abuuro afkaar kala geddisan oo lagu dabbakhi karo aayaha nolosha iyo noolaha labada ba.

Markii ay soo degtay diinta Islaamku waxa ay noqotay xeerkii, afkaartii i shuruucdii ugu ballaadhnayd ee samada ka soo dega, looguna talo gala dunida lagu maamulo. Muddo ka yar kontan sanno ayay jiilkii aqbalay e ugu horreeyey ku gaadhsiiyeen dunida intii badnayd. Intii hoggaanka iyo quwadda adduunka uu islaamku gacanta sare lahaa, waxa ay turjumeer aqoontii diinta ka horraysay ee banii aadamka oo dhan. Waxa ay abuure culuum faro badan oo maaddi ah, waxaanay hindiseen aalado fududeey dhinacyo muhiim u ah nolosha. Waxa ay sidoo kale fasireen Quraanka iy Axaaddiistii, si aqoonta dunida loogu horumariyo.

Nidaamkii Islaamku waxa uu ahaa mid qeexaya in aan adduunku kala qoqobnaan oo caalamka oo idil ay hal dawlad oo Islaami ahi maamush iyada oo bulsho waliba halkeeda deggen. Waxa uu nidaamkaasi caalam horseeday iftiin iyo nabad. Cid aaminsan iyo cid aan aaminsanaynba aqoonta waa loo sinnaa, nolosha waa loo sinnaa, ilbaxnimada waa loo sinnaa, fikirka waa loo sinnaa, dadkana farqi u ma dhexayn. Diinta waxa lagu faafinayay hab nabad iyo nasteexo ka muuqato iyo jihaad leh shuru

anshax iyo asluub bini aadaminimo ka muuqato. Taasi waxay ka dhalat caddaaladdii islaamku dunida ku hoggaaminayay.

Markii ay gaaladu la wareegtay awoodda waxa judhii ba la jiha habaabiy cilmigii, waxaana la afduubay xaqiiqadii lagu hoggaamin lahaa caalamk idil. Dunidii waxa ay u dhigeen weji kale oo ah in la isu maamulo dal iyo gobol iyo gobol. Waxa ay abuureen afkaar iyo aragtiyo la isku khasbayo lagu halaagmayo iftiinka iyo aakhiro ba. Waxa ay sameeyeen mabaadii' magacyo ay islaamka ugu kala qaybinayaan kooxo, si ay ugu dhex yeeshaan qaar taageera oo hirgeliya ujeeddooyinkooda. Taas ayaa ilaa haatan aanay u soo baxayn beryahaa xoog midaysan oo Islaami ahi.

Waxa la is la oggol yahay in fikir waliba uu caqiido salka ku hayo, haddii mufikir tahayna, ma aha cilmigu in aad ka fikirto aayaha ummaddaada adiga oo is waafajinaya fikirkaaga iyo magacyada Falsafad, Dimuqraaddiyad, Xaddaarad, Horumar, iyo wixii la hal maala. Laakiin wa aad caalim tahay marka aad is waafajiso caqiidadaada iyo fikirkaaga. Markaas ayaad jeexi kartaa waddo cad oo lagu guulaysan karo.

Waa waajib in dadku ay fikiraan oo su'aalo iska weydiiyaan astaamaha dabiiciga ah iyo nolosha aadamaha oo dhan. Laakiin marka ay fikrayaar waa in ay garanayaan waxa ay abuuran yihiin ee dunida u joogaan. In qo fikiro waxa xukuma caqliga ku jira, waxa uu ka fikirayana waxa xidha cilmiga ku jira, laakiin sida uu u fikirayo xeerarka iyo xuduudaha xakamaynayaa waa waxa uu aaminsan yahay. Dhawr qarni ka hor ayaa danbaysay in adduunka fikir cusubi ku soo biiro ama cidi ku soo kordhis Sidaas darteed, mufikiriinta casriyadan danbe waxa ay noloshooda ku dhammaystaan in ay marba afkaar tijaabiyaan oo deetana ummadda ay dhasheen ku canaantaan.

Way bannaan tahay in culuumta la taaban karo sida, xisaabaadka, macdanaha, qalabka casriga ah, wershadaha, hubka iyo horumarka Tiknoolojiyadda aad ka baratid gaalada, adiga oo uga jeeda la baro, laak

aan uga jeedin ka baro. Da'yarta Soomaaliyeed ee maanta wax baratay
inay dareensanaadaan in hirdanka iyo baxaalliga afkaarahan dunida ka
socdaa aanay dhammaantood ahayn sida ay inoogu muuqdaan, laakiin
ku biyo shubanayaan sidii ay gaaladu u sii hayn lahayd majaraha caalan
una muquunin lahayd kuwa tirada yar ee ku fahansan fikirka ay wadaan
aha hawl inoo taalla in aynnu ummadda u soo xambaarno fikrado kuwii
lahaa ba qireen hadimooyinkooda, innaga oo aan ka dhergin barashada
dhaxalkeenna qurxoon – diinteenna iyo dhaqankeenna. Kuma doodi kar
in Kitaabku xaddaaradda innaga dabrayo innaga oo aan dhadhansan ka
duxda ku dalaysan aayad qudh ah oo Kitaabkaas ka mid ah iyo xaqiiqac
xeesha fog ee ku xardhan. Sidaas darteed, xorriyadda fikirkaagu waxay
xidhan tahay sida aad u og tahay ama aad uga ogaal la'dahay
xaqiiqooyinkaas.

Dunidan maanta waxa yaalla laba xaaladood oo aad u kala durugsan. T
hore waa fikradihii iyo falsafadihii gaalada oo isugu soo ururay caabbin
awoodaha Islaamka. Waxa ay guluf hubaysan iyo duullaan fikir ku
gaasheeyeen dhulalkii Muslimiinta, iyaga oo ku af gobaadsanaya ilaalin
nabadgalyada adduunka iyo xuquuqaha aadamaha. Tan labaad na waa
islaam ah, weliba Soomaali ah oo halhays ka dhigtay: fikirka ha la xoree
dumarku siyaasadda ha galaan, diinta ayaa ilbaxnimadii hor taagane
malcaamadaha ha la xidho, dimuqraadiyadda ha loo hoggaansamo iyo
arrimmo la hal maala. Is-diiddada labadaas xaaladood waxa ka dhashay
tolow ma awoowyaashii Soomaalida ayaan aqoon sida timaha loo la ba
dabadeedna loo fikiro? Mise waxa aynnu xiiso u qabnaa sida loo tijaabiy
fikradaha? Mise waxa innagu qalloocday tacliintii yarayd ee iskuullada i
shahaadooyinkii?

Marka ummad loo keeno afkaar shisheeye ee la yidhaahdo noloshaada
dabbakh ma aha in ay bulshadu eegto qofka afkaartan dejiyay waxa uu
aaminsan yahay ama jinsiyadda uu yahay, hase yeeshee waxa ay
bulshadaasi ku khasban tahay in ay afkaartaas waafajiso caqiidada ay

aaminsan tahay, si haddii afkaartaas ay wax diinta ka hor imanayaa ku jiraan looga saaro, haddii ay dhammaanteed ka hor imanaysana la iskag tuuro. Taas macnaheedu waa in ummaddu yeelataa meel marjac ah oo la noqoto kuna kala shaandhayso aqoonta iyo aragtida dibadda kaga imanaysa.

F.G. Qormadani waxay markii ugu horreysay ku soo baxday Tirsigii 13aac Majalladda Weedhsan October-November 2013. Waxaan ka soo xiganay Warsidaha Weedhsan.com

Sakariye Saxardiid Axmed (Awaare)

Email: qaraami1987@hotmail.com

admin